

FIRFITCOONI VATTENRIKET GUDIHIIASA

Dabeeecadu waa meel fudud oo laga helo farxad iyo nasasho Meel lagula kulmi karo saaxibbo ama kali lagu noqon karo. Dabeeecada Swiidhan waa mid dadka oo dhan ka dhixeyesa. Xagaa, jiilaal, dayr iyo gu' xilli sanadeed kasta waxaad ka heleysaa xasuus kala duwan. Ku soo dhawaw Vattenriket!

QAXWEYSO OO WAX DUBO

Si aad u fiican oo loogu raaxeysto Vattenriket waa in aad dabeeecada dhix gashaa. Meelo badan oo ka mid ah meelaha la booqdo ee Vattenriket waxaa yaalla miisas iyo kuraas lagu fadhiisto oo wax lagu ag cuno. Meelaha qaarna waxaa ay leeyihiin meelo wax lagu dubto. Soo qaado qoryahaaga ama dhuxusha wax lagu dubto.

Meelo la isu tilmaamo Norra Lingenäset, Ekenabben iyo Äspet.



Qaxweysa oo wax dubo

MALLAAY DABO

Biyo mareeka Helge waxaa uu leeyahay nuucyo badan oo mallaay ah, in ka badan meelo kale oo Swiidhan ka mid ah. Si mallaay loo dabto waa in kaar mallaay-dabasho la iibsadaa. Taa waxaad ku sameyn kartaa naturumka Vattenriket, Kristianstad och Åhus Tourist Center iyo wilibo farriin xagga taleefanka ah. Waxaa jira sharchiyo ku aaddan mallaayga la daban karo iyo goorta la daban karo. Mallaayga qaar waa dhif iyo naadir. Tusaale ahaan nuuca malen, kuwaas lama daban karo.

Meelo la isu tilmaamo Kanalhuset, buunda Kavrö iyo Gropahålet.



Mallaay dabo

SOCO

Caalmaka biyaha maka aad joogtid dabeeecadu waa ay Vattenriket maka aad joogtid dabeeecadu waa ay dhawdahay. Ku wareeg meel ka mid ah meelaha la booqdo ee Vattenriket. Tiirarka rinjiga lagu calaameeyay ayaa waddada ku tusaya. Meeshi qoyaan ah waxaa jira buundo alwaaxeed aad uga gudbi karid. Mar walba oo aad galeysid meel lo' daaqdo eygaagu ha xirnaado, hana u dhawaannin lo'da.

Meelo la isu tilmaamo Linnérundan, Norra Lingenäset iyo Hercules.



Soco

DAAWO SHIMBIR

Vattenriket waa meel fiican oo lagu daawan karo shimbiro. Xilliga jiilaalka waxaa badanaa lagu arkaa gorgor badeed hareeraha biyo mareenka Helge. Xilliga guga waxaa yimaada meesha la booqdo ee Pulken ee Vattenriket shimbiro waaweyn oo kumannaan ah. Hareeraha Vattenriket waxaa ku yaalla minaarada-shimbireedyo badan. Soo qaado fogga-cabbiri ama ka kireyso naturumka. Meelo la isu tilmaamo Linnérundan, Håslövs ängar, Hercules iyo Äspet



Daawo shimbir

Xuquuqda tamash/leyntu waxaa ay dhamaan u suurta gelineysaa in si xur ah loogu dhaqdhaqaqo dabeeecada. Laakiin waa in aanu qaddarinnaa dabeeecada, milkiilaha dhulka iyo booqadayaasha kale. Waa in aadan dhibtamin ama wax ku dheelin. Ka fikir in aad dhamaan qashinka ku riddid meesha qashinka ama aad gurigaaga u qaaddi marka aad meesha ka tageysid. Warbixin ka akhriso Daryeelka Dabeeecada Swiidhan si aad u ogaatid waxa la samaynayo